



Kharashka Dugsiga Foomamka Baakadka Sannad Dugsiyeedka

2023-2024



Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga Qoysaska

Ardayda Darajooinka K-6



Dastuurka Utah wuxuu mamnuucaa kharashka khidmadaha dugsiyada hoose.

Haddii uu ku jiro xanaanada ilaa darajada lexaad, laguma soo dallici karo buugaagta, qalabka fasalka ama saadka, qalabka muusikada, safarada dibadda, isu imaashada, cuntada fudud (waxyabaha kale aan raashinka ahayn ee laga bixiyo Brograamka Qadada Dugsiga), ama waxyabaha kale ee ka dhaca ama la adeegsado maalin dugsiyeedka caadiga.

Khidmadaha waxaa lagu soo dallici karaa oo keliya brograamyada la bixiyo dugsiga ka hor ama kaddib, ama waqtiyada la qaato fasaxa dugsiga. Waxaa dhici karto in khidmad lagu soo dallaco ardayga ku jira darajada lexaad iyo taga dugsiga ay wax ka bartaan hal ama ka badan darajooinka 7-12, haddii dugsiga raaco modelka dugsiga sare iyo waxbarasho siiyo ardayga ku jira darajada lexaad dugsiga.

Sharciga Utah wuxuu rabaa in dugsiyada soo dallaca khidmadaha, in ay hubiyaan in arday kasta ay waalidiintiisa awoodi karin in ay bixiyaan khidmadda, in uu heli karo ka-dhaafidda khidmadda ama waxyaboo kale baddalkii la siin lahaa ka-dhaafidda khidmadda.

Ka-Dhaafidda Khidmadda

Ka-dhaafidda khidmadda waa marka qofka laga dhaafo in uu bixiyo khidmadda. Haddii ardayga uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda, **waa in la dhaafo dhamaan**

khidmada. Haddii aan si gaar ah wax looga qabanin sharciga gobolka, dugsiga waa in uu ka dhaafo dhamaan khidmadaha, sida meel kasta uu ardayga ka qeybgeli karo ama iska dhaafi karo. Tan macnaheeda waxay tahay in ardayda xaq u yeesha ka-dhaafidda khidmadda in ay ka qeybgeli karaan fasal kasta dugsiga ama hawl kasta, iyadoo aan waxba lagu soo dallicin.

Ardayga wuxuu xaq u leeyahay ka-dhaafid haddii:

- qoyska ardayga qaato maal gelinta TANF/SNAP [kuboontka raashinka ama Brograamka Shaqada Qoyska (Family Employment Program) gobolka)]; ardayga qaato Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka (Supplemental Security Income);(Supplemental Nutrition Assistance Program)
- ardayga ayaa loo qoondeeyay McKinney-Vento
- ardayga ku sugaran yahay daryeelka korinta;
- ardayga ku jiro xabsiga gobolka; ama
- ardayga xaq u leeyahay taasoo ku saleysan dakhliga qoyska/reerka (heerarka waxay qaabilsan yahii xaq u yeelashada qadada lacag la'aanta).

* Ardayga wuxuu kaloo xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda haddii uusan la kulmin heerarkaan balse welii uusan awoodin in uu bixiyo khidmadda. Fadlan tag dugsiga xaafadda ama fiiri siyaasadda dagmada si aad u heshid macluumaad badan.

Haddii ardayga rabo in uu dalbado ka-dhaafidda khidmadda, waxaa la weydiin doonaa in uu keeno warqado ku saabsan xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadda, taasoo qeyb ka ah hawsha arjiga.

Si uu u dalbado ka-dhaafidda khidmadda, ardayga wuxuu soo gudbin karaa "Arjiga Ka-Dhaafidda Khidmadda (Darajooinka K-6)". Ogeysiiskaan waxaa la soo raaciay koobiga arjiga iyo koobiyo dheeraad ah waxaa laga heli karaa xafiiska dugsiga, ama bogga internetka khidmadaha dugsiga gobolka marka la gaaro dhamaadka warqadaan. Kaddib marka warqadaha loo gudbiyo dugsiga, waa la joojin doonaa shardiga bixinta khidmadda ilaa laga gaaro go'aan kama dampays ah oo ku saabsan xaq u yeelashada ardayga xagga ka-dhaafidda khidmadda.

Haddii la soo diido arjiga, dugsiga wuxuu soo diri doonaa "Foomka Go'aanka iyo Racfaanka" ("Decision and Appeal Form"). Foomka wuxuu sharaxi doonaa sababta loo diiday arjiga iyo sababta loogu baahan yahay in racfaan laga qaato. Xasuuso in aad mar kasta reebatid koobi. Haddii la soo gudbiyo diidmada ka-dhaafidda khidmadda, dhamaan khidmadaha uma baahna in la bixiyo ilaa go'aan laga gaaro racfaanka.

Haddii ardayga doono in uu dugsiga ka iibsado sawirada dugsiga, buugaagta sannadka, ama waxyaboo kale, kharashkaas ma aha khidmado, mana la dhaafi doono. Sidoo kale, haddii ardayga lumiyoo ama khasaariyo hantida dugsiga, kharashka ku baxa baddalaadda ama hagaajinta ama aha khidmado mana loo baahna in laga dhaafo.



Deeqda, Qarsoodiga, iyo Hirgelinta Khidmadaha

Maaliyadda dugsiga waa kooban tahay, waxaana dhici karto in dugsiga u baahdo kaalmo taasoo dheeraad ku ah khidmadaha. Natijjo ahaan, dugsiga wuxuu weydiisan karaa in canshuurta laga dhimo deeqda saadka dugsiga, qalabka, ama lacagta, balse dugsiga kama dalban karo deeq.

Magaca ardayga waa qarsoodi mana loo kashifi karo qof aan jid u lahayn iyo baahi u qabin macluumaadka, iyadoo aan la firinjin haddii ardayga uu bixiyo khidmadda, deeqda, iyo wax ku biirinta ama haddii kale, ama uu dalbaday, qaatay, ama loo diiday ka-dhaafidda. Hase ahatee, waxaa dhici karto in dugsiga uu ogolaasho ka haysto deeq bixiyaha, in uu aqoonsi ku habboon siiyo qof kasta ama urur kasta oo deeq badan ama wax ku dara dugsiga.

Dugsiga iyo shaqaalaha dugsiga ma reeban karaan, ma yareyn karaan, ama ma xoojin karaan darajooinka ama buundooyinka, ama ma ceshan karaan darajooinka, jadwalada fasalka, buundooyinka, shahaadada, warbixinta, ama dibloomada si loo hirgeliyo bixinta khidmadaha.

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

Iskuulka Deegaanka:

Magaca: _____ Telefoonka: _____

Email: _____ Bogga Internetka: _____

Khidmadaha Iskuulka Degmooyinka/Axdiga:

Magaca: _____ Telefoonka: _____

Email: _____ Bogga Internetka: _____

Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga Qoysaska iyo Ardayda ku jirto Darajooinka 7-12



Sharciga Utah wuxuu ogol yahay in dugsiyada ay khidmad ku soo dallacaan darajooinka todobo ilaa toban iyo labo.

Waxaa dhici karto in ardayga lagu eedeeyo khidmadaha ka-qeybgalka fasalada dugsiga, hawla iyo brograamyada. Ardayga lagama codsan karo ama lagama dooni kari in uu bixiyo khidmad haddii la soo codsigaas ama shardigaas uu soo ogolaado Guddiga Waxbarashada (Board of Education) laguna soo daro jadwalka khidmadda dugsiga ama dagmada.

Sharciga Utah wuxuu rabaa in dugsiyada oo dallaca khidmadaha hubiyaan in ka-dhaafidda khidmadda ama sharciyada kale baddalkii ka-dhaafidda khidmadda la siin lahaa ardy qoyskiisa uusan awoodin in uu bixiyo khidmadda.

Sharaxaadda Khidmadda

Khidmadda waxaa lagu magacaabaa sida shay qiimo lacag leh oo la codsado ama uu dugsiga u rabo arday in uu ka qeybgalo hawl, fasal, ama brograam la bixiyay, mas'uul laga yahay, ama uu taageero dugsiga, dugsiga gaarka, ama dagmada. Codsiagaan ama shardigaan waa waxay ahaan karaan wax si dadban loo sheego. Macnaha in haddii uu jiro shay aan loo baahneyn si looga qeybgalo, balse weli jiro wax laga filaayo ardayga in uu haysto shaygaas, kaasi wuxuu noqon doonaa khidmadda dugsiga. Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah tusaalooyinka khidmadaha:

- | | | |
|------------------------------|--|--|
| • Khidmadaha diiwaan gelinta | • Kharashka ku baxa fasalka ama safarada kooxda (sida jifka, nolosha, iyo cuntada) | • Khidmadaha brograamka dugsiga-kaddib |
| • Kirada qalabka | • Khidmadaha gelitaanka masraxa dugsiga ama cayaarah | • Ganaaxa goynta dugsiga |
| • Khidmadaha ka-qeybgalka | • Kharashka kliinikada kubadda cagta kuleylaha | |

Kharashka faraantiyada fasalka, buugaagta sannadka, sawirada dugsiga, jaakooyinka kor laga geliya warqadaha, iyo waxyaabaha la midka ah ma aha khidmado mana loo baahna in laga dhaafo. Sidoo kale, haddii ardayga lumio ama khasaariyo hantida dugsiga, kharashka baddalaadda ama hagaajinta aysan ahayn khidmado loona baahneyn in laga dhaafo.

Waxaa dhici karto in ardyda laga dalbado in ay bixiyaan khidmadaha koorsooyinka diiwaan gelinta la socota ama imtixanaadka meeleynta sare. Qeypta khidmadaha sida gaarka ah ula xariira darajooinka dugsiga kaddib ama kulliyadda ama buundooyinka laguma qaadi karo ka-dhaafidda khidmadda. Hase ahatee, Guddiga Kulliyadda wuxuu kharashkaan ka yareeyaa kuwa xaqa u yeeshaa.

Ka-Dhaafidda Khidmadda

Ardayga wuxuu xaq u leeyahay ka-dhaafid haddii:

- qoyska qaato maalgelinta TANF/SNAP (kuboontka raashinka Brograamka Shaqada Qoyska (Family employment Program) gobolka;(Supplemental Nutrition Assistance Program)
- ardayga qaato SSI (Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka)
- ardayga ayaa loo quondeeyay McKinney-Vento;
- ardayga ku jiraa daryeelka korinta;
- ardayga ku sugaran yahay xabsiga gobolka; ama
- ardayga wuxuu xaq u leeyahay sida ku saleysan dakhliga qoyska/reerka (heerarka waxay la yimaadaan xisaab la'eg kuwa xaq u yeeshasha qadada lacag la'aanta).

Ka-dhaafidda khidmadda waa ka dhaafidda shardiga in la bixiyo khidmadda. Haddii ardayga xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda, **waa in laga dhaafo dhamaan khidmadda**.

Haddii aan si gaar ah loogu sheegin sharciga gobolka, dugsiga waa in uu ka dhaafo dhamaan khidmadda, meel kasta uu ardayga iska dhaafi karo in uu ka qeybgalo. Tan macnaheeda waxay tahay in ardaydaas xaq u yeelata ka-dhaafidda khidmada ka qeybgeli karaan fasal kasta aa hawl kasta oo ka jira dugsiga, lacag la'aan.

* Ardayga wuxuu kaloo xaq u yeelan karaa ka dhaafidda khidmadda haddii uusan la kulmin heerarkaan mid ka mid ah balse weli awoodin in uu bixiyo khidmadda. Fadlan fiiri dugsiiga hoose ama siyaasadda u dagsan dagmada si aad u heshid macluumaad badan.



Sii Socota Ka Dhaafidda Khidmadaha

Haddii ardayga uu rabo in uu dalbado ka-dhaafidda khidmadda, waxaa la weydiin doonaa in ay la yimaadaan warqadaha xaq u yeelashada ka-dhaafidda, taasoo qeyb ka ah hawsha arjiga.

Si uu u dalbado ka-dhaafidda khidmadda, ardayga wuuu soo gudbin karaa "Arjiga Dalabka Ka-Dhaafidda Khidmadda (Darajoyinka 7-12)". Koobiga arjiga waxaa la soo raaciay ogeysiiskaan, hase ahatee arjiyo dheeraad ah waxaa laga heli karaa xafiiska dugsiga, ama bogga internetka khidmadaha dugsiga gobolka ee ku qoran dhamaadka warqadaan.

Kaddib marka warqadahaan loo gudbiyo dugsiga, waa laga joojin doonaa sharuudaha khidmadda, ilaa go'aan kama dambays ah laga gaaro xaq u ardayga u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda.

Haddii arjiga la soo diido, dugsiga wuxuu soo diri doonaa "Foomka Go'aanka iyo Racfaanka" ("Decision and Appeals Form"). Foomka wuxuu sharaxi doonaa sababta loo soo diiday arjiga iyo sida racfaan looga qaato go'aanka.

Xasuuso in aad mar kasta haysatid koobi. Haddii racfaan laga qaato diidmada ka-dhaafidda khidmadda, looma baahan in la bixyo dhamaan khidmadaha ilaa go'aan laga gaaro racfaanka.

Deeqda, Qarsoodiga, iyo Hirgelinta Khidmadaha

Maaliyadda dugsiga waa kooban yahiin, waxaana dhici karto in dugsiga u baahdo kaalmo taasoo dheeraad ku ah khidmadaha. Natijo ahaan, dugsiga wuxuu weydiisan karaa in canshuurta laga dhimo deeqda saadka dugsiga, qalabka, ama lacagta, balse dugsiga kama dalban karo deeq.

Magaca ardayga waa qarsoodi mana loo kashifi karo qof aan jid u lahayn iyo baahi u qabin macluumaadka, iyadoo aan la fiirinin haddii ardayga uu bixyo khidmadda, deeqda, iyo wax ku biirinta ama haddii kale, ama uu dalbaday, qaatay, ama loo diiday ka-dhaafidda. Hase ahatee, waxaa dhici karto in dugsiga oo ogolaasho ka haysto deeq bixiyaha, in uu aqoonsi ku habboon siyo qof kasta ama urur kasta oo deeq badan ama wax ku dara dugsiga.

Dugsiga iyo shaqaalaha dugsiga ma reeban karaan, ma yareyn karaan, ama xoojin karaan darajoyinka ama buundooyinka, ama ceshan karaan darajoyinka, jadwalada fasalka, buundooyinka, shahaadada, warbixinta, ama dibloomada si loo hirgeliyo bixinta khidmadaha.

Wixii macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

Iskuulka Deegaanka:

Magaca: _____ Telefoonka: _____

Email: _____ Bogga Internetka: _____

Khidmadaha Iskuulka Degmooyinka/Axdiga:

Magaca: _____ Telefoonka: _____

Email: _____ Bogga Internetka: _____

Websaydhka Khidmadaha Dugsiga Waxbarashada ee Gobolka Utah: <https://schools.utah.gov/schoolfees>



Bostarka Khidmadaha Dugsiga Qoysaska Ardayda ku jirta Darajooyinka K-6



LAMA ogola khidmadaha maalin dugsiyeedka darajooyinka K-6.*

Ardayga dugsiga hoose laguma soo dallici karo cuntada fudud ee lagu cuno fasalka, wargeysyada, buugaagta, safarada dibadda, alaabta fanka, waxyaabaha leysku rakibo, qalabka muusikada, ama shay kasta oo qeyb ka ah maalin dugsiyeedka caadiga. Waxaa dhici karto in ardayga laga codsado in uu iskiisa u keeno dugsiga alaabta caadiga guriga, balse looma ciqaabi karo haddii uu keeni waayo alaabta.

*Waxaa dhici karto in khidmad lagu soo dallaco ardayda ku jirta darajada lexaad haddii ardayga tago dugsi ay wax ka bartaan darajooyinka 7-12 keliya iyo dugsiga raaco habka dugsiga sare iyo waxbarasho la siyo ardayda darajada lexaad.

Khidmadaha dugsiga waxaa la soo dallici karaa oo KELIYA marka ay jiraan hawlaho laga fulliyo dugsiga ka hor iyo kaddibma inta ay socdaan fasaxyada dugsiga.

DHAMAAN KHIDMADHA DUGSIGA WAXAY HOOS YIMAADAAN KA-DHAAFID.

YAA XAQ U LEH KA DHAAFO KHIDMADHA?

Waxaa dhici karto in ardayga uu xaq u yeesho in laga dhaafio khidmadaha haddii MID ka mid ah kuwa soo socdo lagu dabaqo.*

- marka qoyska ardayga qaato TANF/SNAP (*kuboontka raashinka ama Brograamka Shaqada Qoyska Gobolka (State Family Employment Program)*)
- marka ardayga qaato SSI (*Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka (Supplemental Security Income)(Supplemental Nutrition Assistance Program)*)
- ardayga ayaa loo qoondeeyay McKinney-Vento
- marka ardayga ku jiro daryeelka qof kale
- marka ardayga ku jiro xabsiga gobolka
- marka ardayga uu xaq u yeesho taasoo ku saleysan dakhliga qoyska/reerka (*heerarka waafaqsan yahiin xaq u yeelashada qadada lacag la'aanta*)

**Ardayga wuxuu kaloo xaq u yeelan karaa ka-dhaafidda khidmadda haddii uusan la kulmin mid ka mid ah heerarkaan balse uusan weli bixin karin khidmadda. Fadlan tag dugsiga ama fiir siyaasadda dagmada si aad u heshid macluumaad badan.*

SIDEEN KU DALBAN KARNAKA DA-KHIDMADHA

Ardayga ama waalidka ayaa dalban kara ka-dhaafidda khidmadda:

- marka ay buuxiyaan arjiga ka-dhaafidda khidmadda
- marka ay dugsiga u gudbiyaan arji buuxa
- marka ay keenaan warqadaha xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadda (*Fiiri Arjiga Ka-Dhaafidda Khidmadda*) si aad u heshid warqadaha loo baahan yahay)

Sharricga gobolka wuxuu rabaa in dugsiyada ay xaqiijiyan xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadda. Dugsiga wuxuu diiwaanka gelin doonaa warqadaha xaq u yeelashada soo gaaray iyo haddii ay la kulmaan sharuudaha xaq u yeelashada kaddibna ardayga waxaa loo dirri doonaa foomka Go'aanka iyo Racfaanka (Decision and Appeals form). Kaddib marka la diiwaan geliyo, koobiyada warqadaha xaq u yeelashada laguma hayn doono faylka dugsiga.

SIDEE AYAY KA-DHAAFIDDA U SAAMAYN DOONTAA KA-QEYBGALKA ARDAYGA HAWLAHA DUGSIGA?

Haddii ardayga uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda, **waa in laga dhaafio DHAMAAN khidmadda.**

Haddii ardayga uu xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda, dugsiga kama rabo ardaygaas in uu shaqeeyo baddalkii uu qaadan lahaa ka-dhaafidda, ama weydiisan lahaa in uu kis-kis u bixiyo khidmadda.

Lama ogola in dugsiga aruuriyo lacag, yareeyo, ama la haro darajooyinka, ama reebto shahaadooyinka, diiwaanada dugsiga, jadwalada fasalka ama ka-qeybgalka inta uu socdo maalin dugsiyeedka caadiga si loo hirgeliyo bixinta kharashka dugsiga.

Si aad u ogaatid in badan, la xariir dugsiga ardaygaada, booqo bogga internetka dugsigaada, ama booqo bogga internetka khidmadaha dugsiga gobolka (<https://schools.utah.gov/schoolfees>).

Su'aalaha, Faalada, ama Arrimaha? La xariir kooxda khidmadaha dugsiga gobolka schoolfees@schools.utah.gov.

Bostarka Khidmadaha Dugsiga Qoysaska Ardayda ku jirta Darajooyinka 7-12



WAA LA HELI KARAA KAALMO HADDII AADAN AWOODIN IN AAD BIXISID KHIDMADAHA DUGSIGA.

Sharciga gobolka ayaa raba in la hubiyo in ardayga ay waalidiintiisa awoodin in ay bixiyian khidmadda in uu heli karo ka-dhaafidda khidmadda ama qodobo kale oo lagu baddalo ka-dhaafidda khidmadda.

DHAMAAN KHIDMADAHA DUGSIGA WAXAY HOOS YIMAADAAN KA-DHAAFID.

YAA XAQ U LEH KA DHAFO KHIDMADAHA?

Waxaa dhici karto in ardayga uu xaq u yeesho in laga dhaafio khidmadaha haddii MID ka mid ah kuwa soo socdo lagu dabaqo.*

- marka qoyska ardayga qaato TANF/SNAP (*kuboontka raashinka ama Brograamka Shaqada Qoyska Gobolka (State Family Employment Program)*)
- marka ardayga qaato SSI (*Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka (Supplemental Security Income)(Supplemental Nutrition Assistance Program)*)
- ardayga ayaa loo qoondeeyay McKinney-Vento
- marka ardayga ku jiro daryeelka qof kale
- marka ardayga ku jiro xabsiga gobolka
- marka ardayga uu xaq u yeesho taasoo ku saleysan dakhliga qoyska/reerka (*heerarka waafaqsan yahiin xaq u yeelashada qadada lacag la'aanta*)

**Ardayga wuxuu kaloo xaq u yeelan karaa ka-dhaafidda khidmadda haddii uusan la kulmin mid ka mid ah heerarkaan balse uusan weli bixin karin khidmadda.*

Fadlan tag dugsiga ama fiir siyaasadda dagmada si aad u heshid maclumaad badan.

SIDEEN KU DALBAN KARNAKA KA-DHAAFIDDA KHIDMADA?

Ardayga ama waalidka ayaa dalban kara ka-dhaafidda khidmadaha:

- marka ay buuxiyaan arjiga ka-dhaafidda khidmadda
- marka ay dugsiga u gudbiyaan arji buuxa
- marka ay keenaan warqadaha xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadda (*Fiiri Arjiga Ka-Dhaafidda Khidmadda*) si aad u heshid warqadaha loo baahan yahay

Sharriga gobolka wuxuu rabaa in dugsiyada ay xaqiijiyaan xaq u yeelashada ka-dhaafidda khidmadda. Dugsiga wuxuu diiwaanka gelin doonaa warqadaha xaq u yeelashada soo gaaray iyo haddii ay la kulmaan sharuudaha xaq u yeelashada kaddibna ardayga waxaa loo dirri doonaa foomka Go'aanka iyo Racfaanka (Decision and Appeals form). Kaddib marka la diiwaan geliyo, koobiyada warqadaha xaq u yeelashada laguma hayn doono faylka dugsiga.

SIDEE AYAY KA-DHAAFIDDA U SAAMAYN DOONTAA KA-QEYBGALKA ARDAYGA HAWLAHA DUGSIGA?

Haddii ardayga uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda, **waa in laga dhafo DHAMAAN khidmadaha**. Tan waxaa ka mid ah khidmadaha diiwaan gelinta, buugaagta, fasalada, isboortiga, naadiyada, kooxaha ku-celcelinta, safarada, khidmadaha albaabka, labbiska, kaararka hawlaha, lokarada, hawlaha ka baxsan manhajka, xerooyinka kooxda kuleylaha, iwm.

Haddii ardayga uu xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda, dugsiga kama rabo ardaygaas in uu shaqeeyo baddalkii uu qaadan lahaa ka-dhaafid, ama weydiisan lahaa in uu kis-kis u bixiyo khidmadda.

Lama ogola in dugsiga uu ka-dhaafidda khidmadda ardayga la wadaago qof aan u baahneyn in uu ogaado.

Lama ogola in dugsiga aruuriyo lacag, yareeyo, ama ceshto darajooyinka, ama reebto shahaadooyinka, diiwaanada dugsiga, jadwalada fasalka ama ka-qeybgalka inta uu socdo maalin dugsiyeedka si loo hirgeliyo bixinta kharashka dugsiga.

Si aad u ogaatid in badan, la xariir dugsiga ardaygaada, booqo bogga internetka dugsigaada, ama booqo bogga internetka khidmadaha dugsiga gobolka (<https://schools.utah.gov/schoolfees>).

Su'aalaha, Faalada, ama Arrimaha? La xariir kooxda khidmadaha dugsiga gobolka schoolfees@schools.utah.gov.





Arjiga Ka-Dhaafidda Khidmadda

Darajooyinka K-6

- Fadlan akhri Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga (School Fees Notice) ka hor inta aadan buuxinin Arjigaan.
- Khidmado LAGUMA soo dallaco hawlaha maalin dugsiyeedka caadiga ee darajooyinka K-6. Arjigaan ka-dhaafidda khidmadda waxaa lagu dabaqaa oo keliya khidmadaha lagu soo dallaco hawlaha dibadda ka ah maalin dugsiyeedka caadiga.
- Haddii dugsiga la soo gaarsiyo xaqijinta in ardayga uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda, waa in ardaygaas laga dhaafio DHAMAAN khidmadaha.
- Dhamaan macluumaadka ku qoran arjigaan waxay ahaan doonaan qarsoodi.

MACLUUMAADKA ARDAYGA:

Magaca ardayga: _____ Nambarka Ardayga #: _____

Cinwaanka: _____

Dugsiga: _____ Heerka darajada: _____

Magaca waalidka ama ilaaliyaha: _____ Nambarka telefoonka: _____

AASAASKA KA-DHAAFIDDA KHIDMADDA:

Fadlan hubso xaq u yeelashada lagu dabaqo: (1 keliya ayaa loo baahan yahay)	Xaqijinta loo baahan yahay in la gudbiyo: *
1. Qoyska wuxuu qaata TANF/FEP/SNAP (Kaalmada ku Meelgaarka ee la siyo Qoysaska u Baahan (Temporary Assistance for Needy Families) ama Brograamka Shaqada Qoyska(Family Employment Program)(kaalmada maaliyadda ama kubonka raashinka)(Supplemental Nutrition Assistance Program)	<ul style="list-style-type: none"> xaqijinta manaaftacaadka ee laga qaato Waaxda Adeegyada Shaaalahaa Utah (Utah Department of Workforce Services) muddada la raadsado ka-dhaafidda khidmadda, taasoo ahaan karta sawirkha elataroonigga shaashadda (screenshot) xaq u yeelashada ama xaaladda.
2. Ardayga wuxuu qaataa Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka (Supplemental Security Income) (SSI, CUNUGGA XAQA U YEESHA EE LOO AQOONSADO IN UU QABO ITAAL DARRI)	<ul style="list-style-type: none"> warqadaha xaqijinta manaaftacaadka ee laga qaato Maamulka Soshal Sekuritiga (Social Security Administration)
3. Ardaygu waxa uu ka soo baxay shuruudaha ku xiran McKinney-Vento.	<ul style="list-style-type: none"> Waxaa laga xaqijiyey Xiriiriyaha degmada ama dugsiyada gaar ah ee McKinney-Vento.
4. Ardayga wuxuu ku sugar yahay Daryeelka Korinta (Foster Care) (ee hoos yimaada Utah amd kormeerka dawladda hoose)	<ul style="list-style-type: none"> foomka qabashada daryeelka dhalin yarka iyo warqadda diiwaan gelinta dugsiga, kaasoo ay buuxiyaan shaaalahaa kiiska lagana soo qaato Qeybta Adeegyada Cunugga iyo Qoyska ee Utah (Utah Division of Child and Family Services) ama Waaxda Caddaaladda Dhalinta ee Utah (Utah Juvenile Justice Department)
5. Ardayga wuxuu ku jiraa Xabsiga Gobolka (State Custody)	
6. Ardayga xaq ayuu u leeyahay sida ku saleysan xaqijinta dakhliga qoyska/reerka Tirada guud ee xubnaha qoyska: _____ Wadarta dakhliga qoyska: \$ _____	<ul style="list-style-type: none"> xaqijinta dakhliga qoyska oo ah qaabka bayaanka dakhliga, dabada jeegagga mushaarka, ama canshuur celinta. (Fiiri bogga 2.)

**Fadlan xasuuso: Dugsiga wuxuu kaa rabaa in aad keentid xaqijinta xaq u yeelashada. Fadlan waxaad warqadaha xaqijintaada ku lifaaqdaa foomkaan marka aad arjigaan u gudbinesid dugsigaada. Sida kaliya ee uu kaga soo baxay shuruudaha McKinney-Vento.*

Haddii aan lagu dabaqi karin inta ku qoran kor balse aad dooneysid in aad dalbatid ka-dhaafidda khidmadaha maxaa yeelay waxaa jira daruufo kale oo adag, fadlan tilmaan sababta (asbaabta) ka dambeysa codsiga: _____

(*Fadlan ku soo lifaaq bog dheeraad ah haddii loo baahdo.*)

Fadlan waxaad arjigaan u dhiibtaa Agaasimaha/Maamulaha Dugsiga ama Maamulaha Khidmadda Dugsiga (School Fee Administrator) marka aad buuxisid. Dhamaan lacag bixinta khidmadda waxaa la joojin doonaa ilaa dugsiga ka gaaro go'aan haddii ardaygaada uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda. Kaddibna, waxaa lagu siin doonaa ogeysiis ku saabsan go'aanka la gaaray. Haddii ardaygaada uu xaq u leeyahay ka-dhaafid, dugsiga kaama rabo in aad buuxisid adeegga, in aad waafaqdid qorshaha in aad kharashka ku bixisid kis-kis, ama in aad saxiixdid IOU baddalkii ka-dhaafidda.

ANIGA WAXAAN HALKAAN KU CADDEYNAA IN MACLUUMAADKA IYO WARQADAHU KU LIFAAQAN AAN ANIGA SOO GUDBIYAY YAHIIIN RUN IYO SAX ILAA INTA AAN OGSOONAHAY AMA AAMINSANAHAY.

TAARIKHDA: _____ SAXIIXA WAALIDKA: _____



Buuxi boggaan haddii aad xullatid fursadda #6 keliya haddii sida hoos timaado qeybta Aasaaska Ka-Dhaafidda Khidmadda.

XAQIIJINTA DAKHLIGA EE LAGA RABO DHAMAAN XUBNAHA REERKA:

(Waxaa loo rabaa ardayda aan xaq u yeelanin taasoo ku saleysan qeyb gaar ah.)

Dakhliga soo gaala reerka waxaa lagu ogaadaa marka leysku darro dhamaan dakhliga reerka ee ka soo baxa dhamaan ilaha kaddibna la barbar dhigo tirada dadka ka tirsan reerka. Reerka wuxuu ka kooban koox qof oo qaraabo ah ama aan ahayn, aan dagganeyn hay'ad amaguri lagu xeroodo, balse u nool sida hal unug dhaqaale. Tan macnaheeda waxay tahay in ay guud ahaan daggan yahiin isla guri iyo in ay qeybsadaan kharashka sida kirada, danabka iyo raashinka.

Waxaad dhamaan liiska dakhliga ku qortaa tiirkka (tiirkarka) ku habboon ka hor inta aan waxba laga goynin.

Magaca:	Dakhliga laga helo Shaqada (ka hor inta aan waxba laga goynin)	Xaqa/Soshal Sekuritiga Hawlgabnimada	Ceydha, Taakuleynta Xaaska, Masaruufka Cunugga, Dakhliga Kale	Wadarta Halkii Qof
Magaca dambe:	Magaca dhexe:	Xarafka hore magaca dhexe:	Dakhliga Bil Kasta	Dakhliga Bil Kasta
1	\$	\$	\$	\$
2	\$	\$	\$	\$
3	\$	\$	\$	\$
4	\$	\$	\$	\$

TUSAALOOYINKA DAKHLIGA:

Dakhliga laga helo Shaqada	Xaqa/Soshal Sekuritiga Hawlgabnimada)	Ceydha, Taakuleynta Xaaska, Masaruufka Cunugga	Dakhliga kale
Mushaarka ku saleysan saacadaha la shaqeeyo, mushaarka go'an, manaaafacaadka la qaato waqtiga shaqo joojinta, magta shaqo la'aanta, magta shaqaalaha, dakhliga laga helo ganacsiga qofka iskiisa u shaqeysto ama beerta	Xaqa beerta, kabidda, dakhliga sekuritiga, lacagaha hawlgabnimada, Dakhliga Soshal Sekuritiga (sida SSI_da cunugga qaato)	*Lacagaha TANF*, lacagaha ceydha, taakuleynta xasaka, iyo lacagha masaruufka cungga	Manaafacadka Itaal Darrida; lacagta caddaanka ee lagala soo baxo keydka; dul saarka iyo qeybsiga fa'iidata; dakhliga laga qaato hantida ma guuraanka, ammaanada, iyo maal gelinta, lacagta joogtada ee laga qaato dad aan la nooleyn reerka; dakhliga kirada; iyo dakhliga kale

Qaadashada kaalmada TANF waxay toos u aqoonsataa in qofka xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda. Looma baahna caddeyn dheeraad ah oo la xariirta dakhliga. Fadlan fiiri qeybta Aasaaska Ka-Dhaafidda Khidmadda (Basis for Fee Waiver) kaddibna gudbi arjiga hoos yimaada xaq u yeelashada TANF.

NIDAAMKA XAQ U YEELASHADA DAKHLIGA

Sannad Dugsiyeedka:

Luulyo 1, 2023 - Juun 30, 2024

Tirada Reerka	Sannad kasta	Bil kasta	Labo Jeer Bil	Labo Todobaad Kasta	Todobaad kasta
1	18,954	1,580	790	729	365
2	25,366	2,137	1,069	986	493
3	32,318	2,694	1,347	1,243	622
4	39,000	3,250	1,625	1,500	750
5	45,682	3,807	1,904	1,757	879
6	52,364	4,364	2,182	2,014	1,007
7	59,046	4,921	2,461	2,271	1,136
8	65,728	5,478	2,739	2,528	1,264
Ku dar xubin kasta oo dheeraad ku ah qoyska	6,682	557	279	257	129



Arjiga Ka-Dhaafidda Khidmadda

Darajooyinka 7-12



- Fadlan akhri Ogeysiiska Khidmadaha Dugsiga (School Fees Notice) (Darajooyinka 7-12) ka hor inta aadan buuxinin Arjigaan!
- Haddii xaqijinta soo gaarto dugsiga in ardayga uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda, waa in ardaygaas laga dhaafo dhamaan khidmada.
- Dhamaan macluumaadka ku qoran arjigaan waxay ahaan doonaan qarsoodi.

MACLUUMAADKA ARDAYGA:

Magaca ardayga: _____ Nambarka Ardayga #: _____

Cinwaanka: _____

Dugsiga: _____ Heerka darajada: _____

Magaca waalidka ama ilaaliyaha: _____ Nambarka telefoonka: _____

AASAASKA KA-DHAAFIDDA KHIDMADDA:

Fadlan hubso xaq u yeelashada lagu dabaqo: (1 keliya ayaa loo baahan yahay)	Xaqijinta loo baahan yahay in la gudbiyo: *
1. Qoyska wuxuu qaata TANF/FEP/SNAP (Kaalmada ku Meelgaarka ee la siyo Qoysaska u Baahan (Temporary Assistance for Needy Families) ama Broogramka Shaqada Qoyska (Family Employment Program) (kaalmada maaliyadda ama kuboonka raashinka)(Supplemental Nutrition Assistance Program)	<ul style="list-style-type: none">xaqijinta manaafacaadka ee laga qaato Waaxda Adeegyada Shaaalahaa Utah (Utah Department of Workforce Services) muddada la raadsado ka-dhaafidda khidmadda, taasoo ahaan karta sawirkha elataroonigga shaashadda (screenshot) xaq u yeelashada ama xaaladda.
2. Ardayga wuxuu qaata Dakhliga Sekuritiga Dheeraadka (Supplemental Security Income) (SSI, CUNUGGA XAQA U YEESHA EE LOO AQOONSADO IN UU QABO ITAAL DARRI)	<ul style="list-style-type: none">warqadaha xaqijinta manaafacaadka ee laga qaato Maamulka Soshal Sekuritiga (Social Security Administration).
3. Ardaygu waxa uu ka soo baxay shuruudaha ku xiran McKinney-Vento.	<ul style="list-style-type: none">Waxaa laga xaqijiyey Xiriiriyaha degmada ama dugsiyada gaar ah ee McKinney-Vento.
4. Ardayga wuxuu ku sugar yahay Daryeekla Korinta (Foster Care) (ee hoos yimaada Utah amd kormeerka dawladda hoose)	<ul style="list-style-type: none">foomka qabashada daryeekla dhalin yarka iyo warqadda diiwaan gelinta dugsiga, kaasoo ay buuxiyaan shaaalahaa kiiska lagana soo qaato Qeybta Adeegyada Cunugga iyo Qoyska ee Utah (Utah Division of Child and Family Services) ama Waaxda Caddaaladda Dhalinta ee Utah (Utah Juvenile Justice Department).
5. Ardayga wuxuu ku jira Xabsiga Gobolka (State Custody) 6. Ardayga xaq ayuu u leeyahay sida ku saleysan xaqijinta dakhliga qoyska/reerka Tirada guud ee xubnaha qoyska: _____ Wadarta dakhliga qoyska: \$ _____	<ul style="list-style-type: none">xaqijinta dakhliga qoyska oo ah qaabka bayaanka dakhliga, dabada jeegagga mushaarka, ama canshuur celinta. (Fiiri bogga 2.)

*Fadlan xasuuso: Dugsiga wuxuu kaa rabaa in aad keentid xaqijinta xaq u yeelashada. Fadlan waxaad warqadaha xaqijintaada ku lifaaqdaa foomkaan marka aad arjigaan u gudbinesid dugsigaada. Sida kaliya ee uu kaga soo baxay shuruudaha McKinney-Vento.

Haddii aan lagu dabaqi karin inta ku qoran kor balse aad dooneysid in aad dalbatid ka-dhaafidda khidmada maxaa yeelay waxaa jira daruufo kale oo adag, fadlan tilmaan sababta (asbaabta) ka dambeysyo codsiga:

(Fadlan ku soo lifaaq bog dheeraad ah haddii loo baahdo.)

Fadlan waxaad arjigaan u dhiibtaa Agaasimaha/Maamulaha Dugsiga ama Maamulaha Khidmadda Dugsiga (School Fee Administrator) marka aad buuxisid. Dhamaan lacag bixinta khidmadda waxaa la joojin doonaa ilaa dugsiga ka gaaro go'aan haddii ardaygaada uu xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda. Kaddibna, waxaa lagu siin doonaa ogeysiis ku saabsan go'aanka la gaaray. Haddii ardaygaada uu xaq u leeyahay ka-dhaafid, dugsiga kaama rabo in aad buuxisid adeegga, in aad waafaqdid qorshaha in aad kharashka ku bixisid kis-kis, ama in aad saxiixdid IOU baddalkii ka-dhaafidda.

ANIGA WAXAAN HALKAAN KU CADDEYNAA IN MACLUUMAADKA IYO WARQADAHU KU LIFAAQAN AAN ANIGA SOO GUDBIYAY YAHIIIN RUN IYO SAX ILAA INTA AAN OGSOONAHAY AMA AAMINSANAHAY.

TAARIKHDA: _____ SAXIIXA WAALIDKA: _____



Buuxi boggaan haddii aad xullatid fursadda #6 keliya haddii sida hoos timaado qeybta Aasaaska Ka-Dhaafidda Khidmadda.

XAQIIJINTA DAKHLIGA EE LAGA RABO DHAMAAN XUBNAHA REERKA:

(Waxaa loo rabaa ardayda aan xaq u yeelanin taasoo ku saleysan qeyb gaar ah.)

Dakhliga soo gaala reerka waxaa lagu ogaadaa marka leysku darro dhamaan dakhliga reerka ee ka soo baxa dhamaan ilaha kaddibna la barbar dhigo tirada dadka ka tirsan reerka. Reerka wuxuu ka kooban koox qof oo qaraabo ah ama aan ahayn, aan dagganeyn hay'ad amaguri lagu xeroodo, balse u nool sida hal unug dhaqaale. Tan macnaheeda waxay tahay in ay guud ahaan daggan yahiin isla guri iyo in ay qeybsadaan kharashka sida kirada, danabka iyo raashinka.

Waxaad dhamaan liiska dakhliga ku qortaa tiirkka (tiirkarka) ku habboon ka hor inta aan waxba laga goynin.

Magaca:	Dakhliga laga helo Shaqada (ka hor inta aan waxba laga goynin)	Xaqa/Soshal Sekuritiga Hawlgabnimada	Ceydha, Taakuleynta Xaaska, Masaruufka Cunugga, Dakhliga Kale	Wadarta Halkii Qof
Magaca dambe:	Magaca dhexe:	Xarafka hore magaca dhexe:	Dakhliga Bil Kasta	Dakhliga Bil Kasta
1	\$	\$	\$	\$
2	\$	\$	\$	\$
3	\$	\$	\$	\$
4	\$	\$	\$	\$

TUSAALOOYINKA DAKHLIGA:

Dakhliga laga helo Shaqada	Xaqa/Soshal Sekuritiga Hawlgabnimada)	Ceydha, Taakuleynta Xaaska, Masaruufka Cunugga	Dakhliga kale
Mushaarka ku saleysan saacadaha la shaqeeyo, mushaarka go'an, manaaafacaadka la qaato waqtiga shaqo joojinta, magta shaqo la'aanta, magta shaqaalaha, dakhliga laga helo ganacsiga qofka iskiisa u shaqeysto ama beerta	Xaqa beerta, kabidda, dakhliga sekuritiga, lacagaha hawlgabnimada, Dakhliga Soshal Sekuritiga (sida SSI_da cunugga qaato)	*Lacagaha TANF*, lacagaha ceydha, taakuleynta xasaka, iyo lacagaha masaruufka cungga	Manaafacadka Itaal Darrida; lacagta caddaanka ee lagala soo baxo keydka; dul saarka iyo qeybsiga fa'iidata; dakhliga laga qaato hantida ma guuraanka, ammaanada, iyo maal gelinta, lacagta joogtada ee laga qaato dad aan la nooleyn reerka; dakhliga kirada; iyo dakhliga kale

Qaadashada kaalmada TANF waxay toos u aqoonsataa in qofka xaq u yeesho ka-dhaafidda khidmadda. Looma baahna caddeyn dheeraad ah oo la xariirta dakhliga. Fadlan fiiri qeybta Aasaaska Ka-Dhaafidda Khidmadda (Basis for Fee Waiver) kaddibna gudbi arjiga hoos yimaada xaq u yeelashada TANF.

NIDAAMKA XAQ U YEELASHADA DAKHLIGA

Sannad Dugsiyeedka:

Luulyo 1, 2023 - Juun 30, 2024

Tirada Reerka	Sannad kasta	Bil kasta	Labo Jeer Bil	Labo Todobaad Kasta	Todobaad kasta
1	18,954	1,580	790	729	365
2	25,366	2,137	1,069	986	493
3	32,318	2,694	1,347	1,243	622
4	39,000	3,250	1,625	1,500	750
5	45,682	3,807	1,904	1,757	879
6	52,364	4,364	2,182	2,014	1,007
7	59,046	4,921	2,461	2,271	1,136
8	65,728	5,478	2,739	2,528	1,264
Ku dar xubin kasta oo dheeraad ku ah qoyska	6,682	557	279	257	129



Foomka Go'aanka Ka-Dhaafidda

Khidmadda iyo Racfaanka



Ku socoto waalidka ama ilaaliyaha sharciga ee: _____

Arjigaada ka-dhaafidda khidmadda waa:

_____ La ogolaaday - waa laga dhaafi doonaa DHAMAAN khidmadaha sannad dugsiyeedka _____

_____ La soo diiday - sababta soo socoto awgeed:

_____ Cunugaada xaq uma laha sida hoos timaado qeybaha xaq u yeelashada.

_____ Aadan keenin warqadaha loo baahan yahay si loo ogaado haddii cunugaada xaq u leeyahay ka-dhaafidda khidmadda.

_____ Wax kale: _____

Saxiixa: _____ Taariikhda: _____

(Saxiixa shaqaalaha dugsiga)

XUQUQDA RACFAANKA WAALIDKA

HADDII AAD QILAAFSAN TAHAY GO'AANKAAN, WAXAAD XAQ U LEEDAHAY IN AAD QAADATID RACFAAN. Si aad racfaan u qaadatid, waxaad warqad (ama foomka Ogeysiiska Racfaanka ee ku daabacan dhanka hoose boggaan) u dirtaa agaasimaha/maamulaha dugsiga gaarka, adiga sharaxa sababta aad u qilaafsan tahay go'aankaan. Ku dar magacaada, magaca cunugaada, iyo taariikhda. **WAA IN AAD RACFAANKAADA KU SOO DIRTAA BOOSTADA AMA AAD KU KEENTAA GACANTA MUDDO TOBAN MAALIN GUDAHODA LAGA BILAABO MARKA AAD HESHID OGEYSIISKAAN.** Haayso koobiga racfaanka si aad u gashatid diiwaankaada. Wakiil ka socda dugsiga ayaa kula soo xariiri doono muddo labo todobaad gudahooda kaddib marka la helo racfaankaada lana qabto shir looga hadlo arrimahaada. Waxaa kaloo lagu siin doonaa koobiga Siyaasadda Racfaanada Ka-Dhaafidda Khidmadda dugsiyada dagmada/dugsiyada gaarka.

DHAMAAN SHARUUDAH BIXINTA KHIDMADAH WAA LA JOOJIN DOONAA ILAA LAGA GAARO GO'AANKA KAMA DAMBAYSTA EE KU SAABSAN RACFAANKAADA.

OGEYSIISKA RACFAANKA

Aniga, _____, waxaan rabaa in aan racfaan ka qaato go'aanka ku saabsan arjigeyga la xariira ka-dhaafidda khidmadda dugsiga asbaabta soo socoto awgeeda: _____

Magaca cunugeyga waa: _____

Fadlan qabso ballanka shirka si looga hadlo racfaankaan. Aniga waan fahamsanahay in dhamaan khidmadaha la joojin doono ilaa laga gaaro go'aanka kama damabaysta kaddibna cunugeyga awood u yeesho in uu si buuxdo uga qeybgalo dhamaan hawlaha dugsiga waqtigaas sida in la bixiyay khdimadaha.

Taariikhda: _____
(Saxiixa qofka soo gudbiyay racfaanka)

Xariirka Dugsiga: _____ Nambarka Telefoonka: _____



Heshiiska Adeegga Foomka Xaqijinta iyo Racfaanka



Sharciga Utah wuxuu qabaa in LEA soo jeedin doonto talooyin kale baddalkii ka-dhaafidda khidmadaha ku filan "si loo hubsado in ardayga aan loo diidin fursad uu uga qeybgalo fasal ama hawl uu dugsiga mas'uul ka yahay ama taageero maxaa yeelay waxaa jirta awood yarri oo lagu bixiyo khidmadda." Haddii loo soo jeediyo, ardayga wuxuu dooran karaa in uu fulliyo adeegga baddalkii ka-dhaafidda khidmadda hase ahatee **dugsiga dagmada kama dalban karo ardayga in uu fulliyo adeegga baddalkii ka-dhaafidda khidmadda.** Haddii ardaygaada doorto in uu fulliyo adeeg, waxaa jira fursado loo baahan yahay in la doorto si uu u dhamaystiro. Fursadaha adeegga waxaa ka mid ah:

- Adeegga dugsiga, sida kaalmada tababarka la siiyo ardayda kale, ama adeegga saacadaha dugsiga caadiga sida kaaliyaha ardayga uu siiyo shaqaalaha dugsiga;
- Adeegga bulshada sida guriga xanaanada ama isbitaalka; ama
- Marka ay jirto baahida gaarka ah, adeegga guriga dhediisa.

_____ wuxuu waafaqsan yahay in uu dhamaystiro _____ saac oo adeeeg ah _____
(Magaca ardayga) _____ (sharaxaad gaaban)

Waa in la dhamaystiro: _____ ka hor. Tani waxay ku filan tahay waajibka ardayga ka saaran khidmadda \$ _____
(Taariikhda)

Dhamaana adeegyada waxaa lagu dallici doonaa xisaabata \$ _____ halkii saac. Kaddib marka aad buuxisid, waxaa laga dhaafi doonaa khidmadaha dugsiga ee ardayga.

SAXIIXYADA:

Ardayga: _____ Taariikhda: _____

Waalidka: _____ Taariikhda: _____

Maamulaha Dugsiga: _____ Taariikhda: _____

Dugsiga dagmada waa in uu hubsado in hawsha adeegga ku habboon tahay da'da ardayga, xaaladda jirka ardayga, iyo garashada ardayga. Sidoo kale, hawsha waa in ay waafaqsan tahay sharciyada gobolka iyo federaalka, sida Sharciga Heerarka Caddaaladda Hawsha Federaalka (Federal Fair Labor Standards Act). Tan waxay u baahan tahay in adeegga la fulliyo 1) muddo macquul ah gudaheeda, 2) halkii saac kasta adeegga waxaa lagu xisaabaa lacag ugu yaraan la'eg mushaarka ugu yar ee iminka jira, iyo 3) saacadaha adeegga ee la shaqeeyo halkii maalin iyo halkii todobaad waaa kooban yahin sida waafaqsan da'da ardayga.

Tusaale ahaan, haddii ardayga xaqa u yeesha lagu soo dallaco \$100 xagga khidmadaha dugsiga marka siyaasadda dugsiga ku saleysan tahay \$10 halkii saac oo adeeg ah, markaas waxaa dhici karto in ardayga la weydiyo in uu shaqeeyo ilaa 10 saac oo adeeg ah.

Hawlaha adeegga waa in loo fulliyo si ardayda aan loo ceebeynin, loo qajilinin, ama loo yassin, iyo waa in aysan fa'iido gaar iyo toos ah siinin shaqaalaha dugsiga ama qoysaskooda. Dheeraad, hawlaha adeegga waa in ay iska ilaaliyan in ay culeys badan saaraan ardayda iyo qoysaskooda iyo in ay tixgelin ku habboon siiyan baahida gaadiidka iyo waxbarashada ardayga iyo mas'uuliyadda kale.



XAQIJINTA ADEEGGA

Haddii ay soo baxaan daruufo aad ugu adkeeyo ardayga in uu dhamaystiro adeegga, isla markiiba ogeysii agaasimaha dugsiga si loo ogaado habeynta loo baahan yahay in la sameeyo.

Ardayda adeegga looma tixgelin doono in ay shaqaale u noqdaan kuwa ay siiyaan adeegga, mana dhici doonto in lacag la siyo ardayda ama dugsiga oo loogu baddalo adeegga. Lama baddali karo shaqaalaha caadiga ee ka shaqeeyo meelaha ay ardayda ka fulliyaan adeegyada, mana la yareyn karo saacadahooda, taasoo ugu wakan hawlahaa adeegga ardayda. Adeegga waxaa loogu talogalay in lagu kabo adeegyada jira, ee ma aha in lagu baddalo wixii ay sameyeen dadka kale.

XAQIIJINTA ADEEGGA

Goobta Adeegga: _____ Adeegga la Fulliyay: _____

Kormeeraha: _____ Saacadaha: _____

Taariikhda Bilowga: _____ Taariikhda Dhamaadka: _____

Goobta Adeegga: _____ Adeegga la Fulliyay: _____

Kormeeraha: _____ Saacadaha: _____

Taariikhda Bilowga: _____ Taariikhda Dhamaadka: _____

_____, wuxuu dhamaystiray dhamaan saacadaha adeegga sida ku qoran kor, iyo wuxuu
(Magaca Ardayga)

fulliyay dhamaan saacadaha adeegga lagu heshiyay sida macquulka ah ilaa heerka suurtogalka sida waafaqsan daruufaha ardayga iyo dugsiga labadaba.

Waalidka: _____ Taariikhda: _____

Kormeeraha: _____ Taariikhda: _____

Aniga waan fiiriay adeegga la bixiyay iyo waxaan ka xaqijistay Kormeeraha in dhamaan adeegga la dhamaystiray sida lagu sheegay kor ilaa inta suurtogalka iyo macquulka ah oo waafaqsan daruufaha ardayga iyo dugsiga labadaba. Sidaas darteed, sida lagu heshiyay, waa laga dhaafay dhamaan khidmadaha ardayga.

Maamulaha Dugsiga: _____ Taariikhda: _____

XUQUUQDA RACFAANKA WAALIDKA

FADLAN HUBSO IN AAD AKHRISID OGEYSIISKA KHIDMADAHA DUGSIGA IYO FOOMKAAN KA HOR INTA AADAN GO'AAN KA GAARIN IN AAD RACFAAN KA QAADATID HESHIISKA ADEEGGA.

Haddii aad qilaafsan tahay heshiiskaan, waxaad xaq u leedahay in aad racfaan ka qaadatid. Si aad u qaadatid racfaan, waxaad warqad u soo dirtaa agaasimaha dugsiga adiga oo u sharaxa sababta aad u qilaafsan tahay heshiiska adeegga. Ku dar magacaada, magaca cunugaada, iyo taariikhda. Haddii aad dooneysid, dugsiga wuxuu haaya foomka racfaanka oo ku yaal bogga xiga kaasoo aad buuxin kartid soona diri kartid baddalkii warqad.

Waa in aad boostada ku soo dirtad ama aad gacanta ku keentid racfaankaada muddo tobant maalin dugsiyeed gudahooda laga bilaabo marka aad heshid ogeysiiskaan. Haayso koobiga racfaanka si aad u gashatid diiwaankaada.

Wakiil ka socda dugsiga ayaa kula soo xariiri doono muddo labo todobaad gudahooda kaddib marka la helo racfaankaada lana qabto shir looga hadlo arrimahaada. Waxaa kaloo lagu siin doonaa koobiga Siyaasadda Racfaanka Khidmadaha Dugsiga (School Fees Appeals Policy) lagana helo qoraal dhamaystiran oo ku saabsan siyaasadaha iyo hababka loo qaato racfaanka.

DHAMAAN SHARUUDAH BIXINTA KHIDMADAHA WAA LA JOOJIN DOONAA ILAA LAGA GAARO GO'AANKA KAMA DAMBAYSTA EE KU SAABSAN RACFAANKAADA.



RACFAANKA LAGA QAATO HESHIISKA ADEEGGA

Magaca ardayga: _____

Dugsiga: _____ Darajada: _____

Aniga, _____, waxaan rabaa in aan racfaan ka qaato heshiiska ku saabsan hawsha adeegga ee loo sameyay cunugeyga taasoo ugu wacan asbaabta soo socda awgood:

_____ Nooca Adeegga: _____

_____ Muddada: _____

_____ Mushaarka lagu dallaco: _____

_____ Kale: _____

Fadlan qabo ballanka shirka si looga hadlo racfaankaan. Aniga waan fahamsanahay in dhamaan khidmadaha la joojin doono ilaa laga gaaro go'aanka kama damabaysta kaddibna cunugegyga awood u yeesho in uu si buuxdo uga qeybgalo dhamaan hawlaha dugsiga waqtigaas sida in la bixiyay khidmadaha.

Saxiixa: _____ Taariikhda: _____

Si aad u heshid maclummaad badan, la xariir dugsiga:

Magaca: _____ Telefoonka: _____

Email: _____ Bogga internetka: _____

La xiriir Khidmadaha Iskuulka ee degmada/jaartarka La xiriir:

Magaca: _____ Telefoonka: _____

Email: _____ Bogga internetka: _____

Tag bogga internetka dugsiga gobolka: <https://schools.utah.gov/schoolfees>

